Fara caruurtiina salaadda markay gaaraan toddoba sano, kuna garaaca haday ka tagaan salaadda iyagoo toban jir ah, una kala duwa meesha ay seexanayaan

Camar Binu Shuceyb wuxuu Aabihii ka wariyey Aabihiina awowgi ka wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: "Fara caruurtiina salaadda markay gaaraan toddoba sano, kuna garaaca haday ka tagaan salaadda iyagoo toban jir ah, una kala duwa meesha ay seexanayaan."

[Xadiis Xasan ah] [Waxa wariyay Abuu Daa'uud]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu cadeeyey inay waajib ku tahay Aabaha inuu amro caruurtiisa wiilal iyo gabdho salaadda, markay da'ada gaaraan toddoba sano, oo uu baro caruurta siday u takan lahaayeen. markay gaaraan toban sano wuxuu ugu darayaa, inuu ku garaaco hadday ka gaabiyaan salaada, waana in loo kala duwo firaashka ay ku seexanayaan.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5272